**SHARCI LR. 02** TAARIIKH: 21/02/2016
**OGGOLAANSHAHA ANSIXINTA SHARCIGA QAXOOTIGA IYO BARAKACAYAASHA QARANKA**

MADAXWEYNAHA J.F.S,

**Markuu Arkay:** Qodobka 87aad, Xarafka ' C ' ee Dastuurka KMG.

**Markuu Arkay :** Qodobka 90aad, Xarafka ' F ' ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Ref: 1142/3/1/9/16 ee 03/02/2016 kuna saabsan Ansaxinta Golaha Shacabka ee Sharciga Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka

**Markuu Tixgeliyay:** Baahida loo qabo in uu dalka kajiro Sharciga Sharciga Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka

WUXUU SOO SAARAY ANSIXINTA SHARCIGAN:

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed Saxiixo sharcigan, Madaxwaynuhu waxa uu oggolaaday Sharciga Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka

**Qodobka 2aad.**

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa maalinta uu Madaxwaynuhu Saxiixo waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 21/02/2016

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO. HAN/0341/2016
TAARIIKH 23/3/2016
SAXIIXA NO.

**Madaxweynaha J.F.S**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

**Ref:** 7742/3/1/9/16 :الرقم　　　**Mogadishu,** 3rd February 2016 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

---

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

---

Og: Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka.
Muqdisho.

---

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

---

Og: Hanti-Dhowrka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

---

Og: Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulada Gobollada iyo Amniga
L/H. Golaha Shacabka

---

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/. Golaha Shacabka.

---

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda
L/H. Golaha Shacabka

---

Ujeeddo: Ansixinta Sharciga Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka

M.ne Madaxweyne;

Waxaan kugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 7aad ee fadhigiisii 31aad ee 3dii Febraayo 2016 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jumhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 155 (Boqol Konton iyo Shan Xildhibaan).
- Xildhibaan diidey: 0
- Xildhibaan ka aamustay 1 (Hal Xildhibaan).

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

MJ/AM

# ANSIXINTA SHARCIGA DHISMAHA HAY'ADDA QAXOOTIGA IYO BARAKACAYAASHA QARANKA.

| Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Tirada Xubnaha Codeysay 156: Oggol (155) Diidmo (0) ka aamustay (1) | |
| Saxiix: M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari" | Taariikh: 3th February 2016 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Jeylaani Nuur Iikar | Taariikh: 3th February 2016 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad | Taariikh: 3th February 2016 |

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xukuumadda Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
الحكومة الصومال
مكتب رئيس الوزراء

*(The Government of Federal Republic of Somalia)*
Office of the Prime Minister

Ref: OPM/ 0000166 /06/2015 Date: 17/06/2015

Ku: Guddoonka Baarlamaanka J.F.S. =Muqdisho=

**Ujeeddo:** **Dib-u-Gudbin Hindise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Dibb-u-soo-Celinta Qaxootiga iyo Dib-u-Dejinta Barakacayaasha Qaranka**

Mudane Guddoomiye,

Sida aad la socoto, waxaa markii ugu horreysay warqadda Lr. XRW/GB/00417/07/13 ee 28.07.2013, la idinkugu soo gudbiyey Hindise Sharciyeedka Hay'adda Dibb-u-soo-Celinta Qaxootiga iyo Dib-u-Dejinta Barakacayaasha Qaranka.

Anigoo tixraacaya warqadda Lr. WAG&F/XW/0085/15 ee 04.04.2015, kana soo baxday Xafiiska Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Federaalka (WAG&F) oo ay ku caddahay in ay waafaqsan yihiin Hindise Sharciyeedka Hay'adda oo hadda ku habaysan in hagiddeeda siyaasadeed ay leedahay WAG&F, balse Hay'addu tahay mid hawlaheeda maamul u madax bannaan; isla markaana Wasiirku uu ku codsanayo in Baarlamaanku hawsha Hindise Sharciyeedka halkeedii kasii wato.

Haddaba, waxaan si sharaf leh idinkaga codsanaynaa in Hindise Sharciyeedka Hay'adda oo halkan ku lifaaqan uu Baarlamaanku hawshiisa qaran ka guto, isagoo halkii uu u marayey kasii wadayana meel mariyo, maadaama ay hadda sii cuslaatay baahida weyn ee loo qabo hawlgal dhammaystiran ee Hay'adda. Waxaan si gaar ah u codsanaynaa in muhimadda koowaad la siiyo dedejinta ansixinta sharcigan.

Mahadsanid,

HENS
HARD COPY ONLY
18/6/15

Mudane Cabdullaahi Axmed Jaamac "Ilko Jiir"
Ku-simaha Ra'iisul Wasaaraha ahna
Wasiirka Cadaaladda

JamhuuriyaddaSoomaaliya
**Xukuumadda Federaalka**
**Wasaaradda ArrimahaGudaha**
**&Federaalka**

جمهورية الصومال
الحكومة الفيدرالية
وزارة الشؤن الداخلية و الفيدرالية

Somali Republic
**Federal Government**
**Ministry of Interior &Federal Affairs**

---

**Ref: WAG&F/XW/0085/15** **Mogadishu, April 4, 2015**

Ku: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, J.F.S.
=Rugtiisa=
Og: Guddoomiyaha Golaha Shacabka J.F.S.
=Rugtiisa=

Ujeeddo: **Dib-u-celin Hindise Sharciyeedka Hay'adda Qaxootiga & Barakacayaasha Qaranka**

Mudane Ra'iisul Wasaare,

Kadib markaan arkay Hindise Sharciyeedka Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka, halkanna ku lifaaqan, kaas oo qeexaya in Hay'addu tahay mid hagiddeedaa siyaasaddeed ay leedahay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka, balse fulinta hawlaheeda shaqo u madax-bannaan.

Kadib markaan tixgeliyey hawlaha qiimaha leh ee Guddoonka iyo xildhibaannada Golaha Shacabku ka guteen Hindese Sharciyeedka kor ku xusan;

Kadib markaan ku qancay talooyinka ay soo kala gudbiyeen Guddiyada Golaha ee Xuquuqal-Insaanka, Haweenka iyo Arrimaha Bani'aadamka, iyo midka Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah;

Waxaan si sharaf leh idin kugu wargelinayaa in aan waafaqsanahay soo jeedinnada Hindise Sharciyeedka oo hore Golaha Wasiirradu ku go'aansadeen, kuna soo gudbiyeen warqadda Lr:XRW/GB/00417/07/13;

Waxaan idinka codsanayaa in aad Hindise Sharciyeedka dib ugu celiso Baarlamaanka si hawshiisa uga sii wato, una meel mariyo sharciga maadaama baahi weyn ee qaran shaqadiisa loo qabo.

Mahadsanid,

H.E. Abdurahman Mohamed Hussein
Minister of Interior and Federal Affairs

Address: Via Tanzania, 888 building, Tel: +2526-17683281, Email: odowaa@gmail.com- Mogadishu-Somalia.

# Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

## SHARCIGA DHISMAHA HAY'ADDA QAXOOTIGA IYO BARAKACAYAASHA QARANKA

**Sharci Lr: _________ ee ____________**

**Qodobka 1aad:**

**Qeexid**

**Hay'adda:** waxaa loola jeedaa Hay'ad Qaran ee madax-bannaan oo heerka Dowladda Federaalka ah, qaabilsanna dadka Qaxootiga ka soo noqonaya, Barakacayaasha iyo kuwa Qaxootiga ah ee lagu dhisay Qodobka 2aad ee Sharcigan.

**Guddiga Sare ee Maamulka:** waxaa loola jeedaa Guddiga Hay'adda ee ka arrimiya arrimaha maamulka ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha ee lagu dhisay Qodobka 8-aad (a) ee Sharcigan.

**Guddoomiyaha Hay'adda:** (Commissioner) waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Maamulka, ahna Madaxa Hay'adda.

**Sharciga Qaxootiga ee Geneva:** (Geneva Refugee Convention) waxaa loola jeedaa Sharciga Arrimaha Qaxootiga ee Julaay 28, 1951 iyo Dibu habayntiisii 'Additional Protocol' ee Jannaayo 31, 1967.

**Mabaadiida Hagitaanka**: (Guiding Principles) waxaa loola jeedaa Mabaadiidii 1998 ee Qaramada Midoobay ee ku saabsanaa Dadka Barakacayaasha ah.

**Heshiiska Kampala:** (Kampala Convention) waxaa loola jeedaa Heshiiskii Midowga Afrika ee Ilaalinta iyo Kaalmaynta Dadka Barakacayaasha ah ee Afrika ee Oktoober 22, 2009.

**Heshiiska Qaxootiga ee Ururka Midowga Afrika:** (OAU Refugee Convention) waxaa loola jeedaa Heshiiska OAU ee Seteember 10, 1969 ee ku saabsanaa Xaaladaha Gaarka ah ee Dhibaatooyinka Qaxootiga Afrika.

**Qaxooti:** (Refugee) waxaa loola jeedaa qofkii la cararay cabsi sal leh oo ah in lagu waxyeelaynayo sabab la xariira: midab, diin, dhalasho, ka mid noqosho koox ama urur siyaaso, kaas oo dibedda ka jooga dalkii uu u dhashay, awoodin ama haysan ilaalinta dalkii uu u dhashay; qofkaas oo aan haysan degenaansho, joogana dal dibedda ka ah kii uu u dhashay.

**Barakacayaal:** (Internally Displaced Persons – IDPs) waxaa loola jeeda dadka Soomaalida ah ee lagu khasbay in ay ka qaxaan guryadoodii ama goobihii kale ee ay dagganaayeen, uga cararay saamaynta dagaallada sokeeye, qalalaase,

xadgudug xuquuqda bani'aadaminnimo oo ay sababtay fal dad ama dabiici, dadkaas oo aan ka gudbin xudduudaha Soomaaliya ee caalamiga ah.

**Gargaar-sugeyaal:** (Persons of Concern) waxaa loola jeedaa dadka Qaxootiga ka soo noqonaya, Barakacayaasha iyo kuwa Qaxootiga ah.

**Soo-noqde:** (Returnee) waxaa loola jeedaa qof kasta oo barakace hore u ahaa haddana si ikhtiyaari ah ugu noqonaya meeshii uu daganaan jiray inta uusan barakicin ama qof kasta ee si ikhtiyaari ah qaxootinnimo ugu soo laabtay Soomaaliya, haddana ku sugan Soomaaliya.

**Qodobka 2aad:**
**Dhismaha Hay'adda**

1. Waxaa la dhisay hay'ad heer Dawladda Federaalka ee arrimaha qaxootiga soo noqonaya, barakacayaasha iyo qoxootiga ee lagu magacaabo "**Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka",** hadda ka dibna waxaa loogu yeerayaa '***Hay'adda***";
2. Hay'addu waa mid madax-bannaan si waafaqsan Dastuurka kmg Federaalka ee Jamhuuriyadda, iyadoo sharciga dhawraysana waxay fulinaysaa dhammaan hawlaha la xariira barakacayaasha, qaxootiga iyo soo-noqdaha, waxayna meel-marinaysaa hawlaha iyo qorshayaasha la xariira gargaar-sugayaashaas. Arrintani kama dulqaadayso Dowladda in ay gudato xilkeedii ahaa in ay qaybtooda ka qaataan kaalmaynta iyo ilaalinta xilka ka saran u adeegidda muwaadiniinta Soomaaliyeed.
3. Hay'adda ku xusan farqadda 1aad ee Qodobkan, waxaa hoggaaminaya Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka, waxaana lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne kadib soo jeedinta Golaha Wasiirrada, kaas oo xilkiisa hal mar oo kale loo cusboonaysiin karo; waxaana hadda kadib loogu yeerayaa '**Guddoomiyaha Hay'adda**' (***the Commissioner)***.
4. Hay'addu waxay fulinaysaa qorshaha siyaasadeed ee Golaha Wasiirrada ee khuseeya hawlaheeda la xariira dhinacyada iyo wasaaradaha kala duwan.
5. Hay'adda waxaa leh hagiddeeda siyaasadeed Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka, iyadoo hawlaheeda shaqo u madax-bannaana waxaa Guddoomiyaha Hay'addu warbixinta hawlaha Hay'adda toos u siinayaa Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Arr. Federaalka.

**Qodobka 3aad:**

**Saldhigga Sharci ee Hay'adda**

Hay'addu waxay u hoggaansamaysaa Sharciyada iyo Xeerarka soo socda:

1. Xuquuqda muwaadinka ee ku xusan Dastuurka KMG ah eeJamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda;
3. Shuruudaha iyo Xeerarka habka Xisaabaadka & Hanti-dawrka Dawladda;
4. Shuruucda iyo Xeerarka la xariira nidaaminta dadka gargaar-sugayaasha ah ee Dawladda Soomaaliyeed hore u aqoonsatay ama sharci ka soo saarto sida: ilaalintooda, xaq-dhawrkooda, diiwaan-gelintooda, degaan-dejintooda iyo heshiisyada kale ee khuseeya;
5. Dacwadaha khuseeya go'aannada Hay'adda waxaa loo marayaa hab qaanuuni ah ee sharciyadda dalka waafaqsan; iyo
6. Dadka shisheeyaha ah ee qaxooti ku ah gudaha dalka Soomaaliya, waxaa maamuliddooda u xilsaaran Hay'addan, iyadoo lagu dhaqayo shuruucda dalka ee arrimahaas u degsan.

**Qodobka 4aad:**

**Maqaamka Hay'adda**

1. Hay'addu waxay leedahay qaanuun sharciyeed, waxayna gudataa falalka sharcigu u ogol yahay ee lagama maarmaanka u ah gudashada hawlaheeda.
2. Hay'addu waxay leedahay shaabad iyo calaamad u gaar ah.

**Qodobka 5aad:**

**Ujeedooyinka Hay'adda**

Ujeedooyinka loo abuuray Hay'addani waa:

1. Ka shaqaynta iyo isku xirka dhammaan hawlaha wax loogu qabanayo ama lagu ilaalinayo dadka gargaar-sugayaasha ah, iyadoo talooyinka ku haboon loo gudbinayo hay'adaha kale ee dowladeed;
2. Dejinta istiraatiijiyadaha, siyaasadaha iyo mashaariicda la xariira dadka gargaar-sugayaasha ah iyadoo lala kaashanayo Wasaaradaha masuuliyadaha ku leh arrimahaas iyo Hay'adaha Qaramada Midoobay iyo hay'adaha kale, sida ay qabaan nidaamyada caalamiga ah, gaar ahaan Mabaadiida Hagitaanka, Heshiiska Kampala, Heshiiska Qaxootiga ee Geneva iyo Heshiiskii Qaxootiga ee Ururka Midowga Afrika;
3. Hirgalinta sidii xal waara loogu heli lahaa gargaar sugayaasha iyadoo la kaashanaysa Wasaaradaha Dowladda, Hay'adaha Qaramada Midoobay iyo dhammaan hay'adaha Dowladaha kale, lana eegayo sidii xalkaasi u noqon lahaa mid nabadgelyo iyo sharaf u horseeda gargaar-sugayaasha,

ogolaanayana xaqa ay u leeyihiin dhaqdhaqaaq iyo doorasho in ay degaan meeshii ay rabaan;
4. Matalaadda Dowladda ee xagga wadahadallada farsamo ee ku saabsan sidii xal waara ee meelmar ah loogu heli lahaa gargaar-sugayaasha ee ka dhici kara Soomaaliya gudaheeda iyo dibaddeedaba oo ay ku jiraan waddamada magangeliyey qaxootiga Soomaaliyeed;
5. Xaqiijinta dokumentiyada Qaran ee dadka barakacayaasha ah, kuwa soo noqda iyo kuwa qaxootiga ahba si la siman muwaadiinta Soomaaliyeed, iyadoo lagu dhaqayo shuruucda xuquuqda insaanka ee caalamiga ah iyo kuwa takoor la'aanta ah, lalana kaashanayo hay'adaha Dowliga ah ee ay khusayso;
6. Maamulka xerooyinka, goobaha dib-u-dejinta iyo tas'hiilaadka la xariira, iyadoo si gaar ah loo damaanad qaadayo nabadgelyada iyo ammaanka gargaar-sugayaasha ku dhaqan xeryaha iyo goobaha kale, lalana kaashanayo hay'adaha amniga u xilsaaran.
7. Abuuridda iyo dhaqangelinta barnaamijyo iyo mashaariic sahlaysa dib-u-dejin iyo is-dhexgal, keenina kara kor u qaadidda wada-noolaanshaha iyo horumarka gargaar-sugayaasha iyo bulshada ay ku dhex noolaanayaan;
8. Raadinta deeqaha, Isku dubbarideeda, qabashadeeda, kaydinteeda, dhowristeeda, iyadoo loo gaarsiinayo si caddaad ah gargaar-sugayaasha, iyo sidoo kale maamulidda kaalmooyinka cunto, daawo iyo qalab guriyeedba.

**Qodobka 6aad:**

**Aqoonsiga Gargaar-sugayaasha**

Shuruudaha iyo hababka loo marayo aqoonsiga gargaar-sugayasha waxaa lagu qeexi doonaa Xeer gaar ah.

**Qodobka 7aad:**

**Hab-dhismeedka Hay'adda**

1. Hay'addu, si ay hawsheeda u fuliso, waxay yeelanaysaa xubnaha soo socda:
    a. Guddoomiyaha Hay'adda
    b. Guddiga Sare ee Maamulka Hay'adda.
    c. Laba Guddoomiye Ku-xigeen ee Hay'adda.
    d. Agaasimeyaal iyo hawlwadeennadii kale ee loo baahdo.

2. Hay'addu waxay yeelan kartaa guddiyo qabta hawlo kala gaar ah. Guddiyadaas waxaa ka mid ah Guddiga Qaxootiga iyo Barakacayaasha oo ka kooban shan (5) xubnood oo ka kala imaanaya wasaaradaha Xukuumadda

ee Arrimaha Gudaha, Dibedda, Caddaaladda iyo laba (2) wasaaradood ee ka mid ah kuwa adeegga bulshada ku shaqada leh.

3. Qaab-Dhimeedka Hay'adda iyo waajibaadyada Guddiga Sare ee Maamulka waxaa lagu caddaynayaa Xeer-hoosaad u gaar ah oo ay Guddiga Sare ku soo saarayaan kulammadooda u horreeya.

**Qodobka 8aad:**
**Guddiga Sare ee Maamulka Hay'adda**

1. Guddiga Sare ee Hay'addu wuxuu ka kooban yahay:
    a. Guddoomiyaha Hay'adda.
    b. Labadada Guddoomiye Ku-xigeen ee Hay'adda.
    c. Laba (2) xubnood oo leh aqoon iyo khibrad, uuna soo magacaabo Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Federaalka, kadib soo jeecinta Guddoomiyaha Hay'adda.
2. Xubnaha Guddiga Sare iyo saraakiisha sar sare ee Hay'adda xubnaha loo magacaabayo waa in ay noqdaan kuwo lagu xulay aqoonta iyo waaya'aragnimada ay u leeyhiin:
    a. Ilaalinta xuquuqda dadka gargaar-sugayaasha ah;
    b. Xuquuqda aadanaha iyo shuruucda kale ee Caalamiga ah;
    c. Wax u qabadka bulshada iyo ka shaqaynta horumarkooda.

**Qodobka 9aad:**
**Waajibaadka Xubnaha Guddiga Sare ee Maamulka**

1. Dejinta Qorshaha siyaasadeed ee Hay'adda ee lagu gaarayo xal waara ee qaxootiga Soomaaliyeed ee dibadda jira iyo barakacayaasha Dalka Gudihiisa ku ah;
2. Dabagalka iyo hubinta sidii loo meel-mariyey siyaasadda iyo qorshe hawleedka Hay'adda;
3. Ansixinta miisaaniyadda iyo xisaabxirka Hay'adda ee uu soo hordhigo Guddoomiyaha Hay'adda;
4. Gacan-siinta Guddoomiyaha Hay'adda ee horumarinta istiraatijiyadda iyo qorshaha ee Hay'adda hawlaheeda lagu hagaajinayo;
5. Guddiga waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaha Hay'adda, wuxuuna yeelanayaa ugu yaraan bishii hal fadhi ee caadi ah iyo markii kale ee loo baahdo;

**Qodobka 10aad:**

**Xilka iyo Awoodda Guddoomiyaha Hay'adda**

Guddoomiyaha Hay'adda waa Madaxa xubnaha Guddiga Sare ee Maamulka iyo Hoggaanka maamulka Hay'adda, masuulna ka ah waajibaadka fulineed ee hawlaha Hay'adda si waafaqsan Xeer-hoosaadka Hay'adda, iyo siyaasadda iyo shuruucda Dalka; wuxuuna yeelanayaa awoodaha iyo waajibaadyada hoos ku qoran:

1. Ilaalinta awoodaha iyo waajibaadka Hay'adda ee ku cad qodobka 5-aad ee Sharcigan.
2. Maaraynta, isku-duwidda iyo kormeerka hawlaha Hay'adda loo dhisay iyo hawl-wadeenadeeda si waafaqsan siyaasadda iyo sharciyada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
3. Iyadoo lala tashanayo Ra'iisul Wasaaraha iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha, diyaarinta iyo xaqiijinta siyaasadda qaran iyo istiraarijiyadeed ee kor loogu qaadayo xuquuqda iyo sharafta gargaar-sugayaasha, iyo sidii ay u heli lahaayeen dib-u-soo-celin, dib-u-dejin iyo isla noolaansho.
4. Xiriirrinta hawlaha adeegga ee Hay'adda kala dhexeeya hay'adaha Qaranka, dawladdaha martigeliya qaxootiga Soomaalida, hay'adaha caalamka iyo samafallada, horumarinta iyo ciddii kale ee ay khusayso wax u qabashada arrimaha gargaar-sugayaasha;
5. Matalaadda Xukuumadda arrimaha shaqo ee khuseeya gargaar sugayaasha iyo saxiixa heshiisyada heerka Hay'adda ee lala galayo Hay'adaha Samafalka, kuwa Caalamiga ah iyo Dalalka qaxootiga Soomaaliyeed laga soo celinayo,  si waafaqsan shuruucda Dalka iyo kuwa caalamkaba;
6. Diyaarinta iyo abaabulidda qorshayaal dhaxalgal ah ee waqtiyaysan oo lagu maamulayo, lagu soo dejinayo, lagu kaydinayo, lagu ilaalinayo, lagu qaybinayo kaalmada iyo shaqaalaha ka hawlgala wax u qabashada gargaar sugayaasha; iyo sidoo kale diyaarinta iyo dhaqangelinta mashaariicda awood u siinaya in gargaar sugayaashu gaaraan in ay noloshooda dib u dhistaan, isugu filnaadaan, kana qayb-qaataan horumarka iyo dhismaha Dalka;
7. Abaabulidda hababka lagu soo dhawaynayo iyo kuwa lagu fududaynayo dalabyada arji ee qaxootiga soo noqonaya iyo guud ahaan gargaar sugayaasha, iyo sidoo kale samaynta aqoonsiyada kala duwan ee barakacayaasha, qaxootiga dalka dibeddiisa ka soo noqda iyo kuwa qaxootiga dalka ku ah.
8. Iyadoo lala tashanayo Wasaaradaha Xukuumadda ee ay kala khusayso, dalalka qaxootiga magan-geliya iyo hay'addaha caalamiga ah ee arrimahaas ku shaqada leh, tilmaamidda goobaha ka midka ah dalka Soomaaliya ee ay

kasoo gudbayaan, ku hakanayaan iyo kuwo ku-meel-gaar ama joogto u ahaanaysa gargaar sugayaasha.

9. Maamulidda xarumaha iyo wixii tas'hiilaad ah ee loogu adeegayo gargaar sugayaasha iyadoo lala kaashanayo hay'adaha dowliga ah ee ay khusayso.
10. Abuuridda waaxyo shaqo-fulineed iyo kuwo la-talin oo ay ansixinayaan Guddiga Sare ee Maamulku, isagoo ku kormeeraya habka shaqo fulineed oo uu u abaabulayo xoog aqooneed iyo qalab shaqo ee fuliya mashaariic waxgal ah, waqtiyaysanna;
11. Fulinta shaqooyinkii kale ee muhim u ah gaaridda ujeedada Ha'adda ee sharcigu ogol yahay;
12. Magacaabidda Guddoomiyaha Hay'adda waxaa leh Golaha Wasiirrada, waxaana ogolaanaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka, dekereetana ku soo saaraya. Xil ka qaadista Guddoomiaya waxaa loo marayaa isla habkii lagu soo magacaabay.

**Qodobka 11aad:**

**Ku-Xigeen Guddoomiyaha Hay'adda**

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa laba (2) Guddoomiye ku-xigeen.
2. Kadib soojeedinta Golaha Wasiirrada, waxaa Madaxweynaha Jamhuuriyaddu magacaabayaa guddoomiye Ku-xigeennada hay'adda.
3. Muddada xil haynta Guddoomiye Ku-xigeen waa afar (4) sano oo hal mar la cusboonaysiin karo.
4. Guddoomiye Ku-xigeennadu waxay xubin ka yihiin Guddiga Sare ee Maamulka Hay'adda.
5. Guddoomiye Ku-xigeennadu Waxay sii wadaan hawlaha caadiga ah ee Guddoomiyaha Hay'adda marka uu maqan yahay, ay jiraan sababo uu la gudan waayo xilkiisa ama Guddoomiyaha xilka laga qaado.
6. Waxay fuliyaan hawshii uu Guddoomiyaha Hay'adda u xilsaaro.
7. Magacaabidda Guddimiye Ku-xigeennada Hay'adda waxaa leh Golaha Wasiirrada, waxaana ogolaanaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka, dekereetana ku soo saaraya. Xil ka qaadista Guddoomiye Ku-xigeennada waxaa loo marayaa isla habkii lagu soo magacaabay.

**Qodobka 12aad:**

**Shaqaalaha**

1. Xuquuqda iyo waajibaadka sharciga ah iyo xuquuqda dhaqaale ee shaqaalaha Hay'adda waxaa xukumaya Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda;

2. Shaqaalaha Hay'adda ee joogtada ah waxay noqonayaan shaqaale dowladeed ee Hay'adda loogu magacaabay, iyadoo la marayo, laguna dhaqayo Sharciga Shaqaalaha Dalka.

**Qodobka 13aad:**
**Sirnimada Xogta**

1. Hay'adda waxaa waajib ku ah in ay ilaaliso dhammaan xogta gargaar sugayaasha.
2. Shaqaale, wakiil iyo cid kale midkoodna ma gudbin karo xog qarsoodi ah sida uu qabo sharcigani, marka laga reebo:
    a. Ogolaansho laga haysto Guddoomiyaha;
    b. Fulin hawleed sharcigani u ogolaanayo;
    c. Amar ka yimid maxkamad qaanuuni ah.
3. Ciddii ku xadgudubta sharcigan waxay galaysaa fal dambi, waxaa laga qaadayaa tallaabo waafaqsan sharciga Dalka.

**Qodobka 14aad:**
**Miisaaniyadda iyo Hantida Hay'adda**

1. Hantida Hay'addu waxay ka kooban tahay:
    a. Miisaaniyadda sannadlaha ah ee Hay'adda ee ay qorshayso Xukuumaddu, ansixiyana Golaha Shacabku iyo/ama kab dhaqaale ee uga yimaada hay'adaha caalamiga ah ama dowlado hawl-wadaag la leh;
    b. Hantida ma-guurtada ah ee hore u lahaan jirtay Hay'addii Qaxootiga Qaranka, hantida lagu wareejiyey ama mid dib loo siiyo, looguna talo galay Hay'addu in ay xilkeeda ku gudato;
2. Guddoomiyaha Hay'addu wuxuu diyaarinta miisaaniyad-sannadeedka, kadib marka uu ka doodo, ogolaadana Guddiga Sare ee Maamulka, wuxuuna sii marinayaa Wariirka Arrimaha Gudaha iyo Federaalka, si uu ugu gudbiyo Golaha Wasiirrada;
3. Hay'addu waxaa dhaqaalaha iyo hantida soo gasha, bixiddooda iyo isticmaaloodaba lagu dhaqayaa hababka xisaabaadka iyo baarista ee hantida Dawladda.

**Qodobka 15aad:**
**Warbixin Sanadeedka Hay'adda**

Guddoomiyaha Hay'adda waxaa laga doonayaa in uu diyaarinyo warbixin-sannadeedka Hay'adda, una gudbiyo Golaha Wasiirrada isaga oo usii marinaya Wasiirka Arrimaha Gudaha, taas oo ay ku jiraan hawlaha shaqo iyo waxqabad ee hay'adda iyo sidoo kale xaaladaha culays ee la soo gudboonaaday Hay'adda.

**Qodobka 16aad:**

**Canshuur-dhaaf**

Hay'addu waxay leedahay canshuur-dhaaf heer federal iyo heer Qaranba, kaas oo la xariira deeqaha iyo kaalmooyinka loogu yabooho Hay'adda iyo dhammaan wixii ay dibedda ka soo iibsanayso si ay ugu hawlgasho.

**Qodobka 17aad:**

**Xarun iyo Laamo**

1. Xarunta Hay'addu waa caasimadda Dalka ee Muqdisho, waxayna Laamo ku yeelanaysaa Dawlad-Goboleedyada iyo Gobollada dalka hadba sidii loogu baahdo.
2. Laamaha Dowlad-Goboleedyadu waxay toos ula shaqaynayaan Hay'adda iyo hadba masuuliyiinta Dowlad-Goboleedyada ee u xilsaaran u adeegidda qaxootiga soo noqonaya iyo barakacayaasha ku ah degaannadooda.
3. Laamaha Dowlad-Goboleedyada iyo kuwa Goboleedkuba iyaga ayaa fulinaya hawlaha maamul iyo qorshe ee gudaha degaannadooda, Hay'adduna ayada ayaa leh qorshaha guud ee dhinaca Federaalka ka imaanaya, xiriika dibedda iyo heshiisyada lala galayo hay'adaha caalamiga ah.
4. Habka wada shaqayn ee Hay'adda iyo Laamaha Dowlad-Goboleedyada waxaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka ee Dowladda Dhexe soo saaraysaa awaamiir cad kadib talo soo jeedinta Guddiga Sare ee Maamulka Hay'adda.

**Qodobka 18aad:**

**Baabi'in**

Xeer iyo awaamiir kasta oo aan la socon karin ama kasoo horjeeda qodobbada Xeerkan waa la laalay.

**Qodobka 19aad:**

**Dhaqan-gal**

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Golaha Shacabka, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, waxaana laguna soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**Tusmo:**


Qodobka 1aad: Qeexid .......... 1

Qodobka 2aad: Dhismaha Hay'adda .......... 2

Qodobka 3aad: Saldhigga Sharci ee Hay'adda .......... 3

Qodobka 4aad: Maqaamka Hay'adda .......... 3

Qodobka 5aad: Ujeedooyinka Hay'adda .......... 3

Qodobka 6aad: Aqoonsiga Gargaar-sugayaasha .......... 4

Qodobka 7aad: Hab-dhismeedka Hay'adda .......... 4

Qodobka 8aad: Guddiga Sare ee Maamulka Hay'adda .......... 5

Qodobka 9aad: Waajibaadka Xubnaha Guddiga Sare ee Maamulka .......... 5

Qodobka 10aad: Xilka iyo Awoodda Guddoomiyaha Hay'adda .......... 6

Qodobka 11aad: Ku-Xigeen Guddoomiyaha Hay'adda .......... 7

Qodobka 12aad: Shaqaalaha .......... 7

Qodobka 13aad: Sirnimada Xogta .......... 8

Qodobka 14aad: Miisaaniyadda iyo Hantida Hay'adda .......... 8

Qodobka 15aad: Warbixin Sanadeedka Hay'adda .......... 8

Qodobka 16aad: Canshuur-dhaaf .......... 9

Qodobka 17aad: Xarun iyo Laamo .......... 9

Qodobka 18aad: Baabi'in .......... 9

Qodobka 19aad: Dhaqan-gal .......... 9